

# Terebess Collection



Abdurahman H. H. Aden  
SZOMÁLI BÖLCSESSÉGEK  
Terebess Gábor és György fordítása  
Terebess Kiadó, Budapest, 1999

Javított, bővített, kétnyelvű (szomáli-magyar) elektronikus kiadás

Kiadásunk az alábbi háromnyelvű közmondás gyűjteményből készült:

**Murtidu waa Hodantinnimo...**

Maahmaahyada iyo Oraahda Soomaaliyeed  
waxaa isku soo habeeyey: Abdurahman H. H. Aden  
waxaa lawada shaqeyey: Irene Aden

**From the Soul of Nomads**

Proverbs and Sayings of the Somalis  
collected by Abdurahman H. H. Aden  
in cooperation with Irene Aden

**Aus der Seele der Hirten**

Sprichwörter und Spruchweisheiten der Somali  
zusammengestellt von Abdurahman H. H. Aden  
unter Mitarbeit von Irene Aden

Cologne: Omimee, Intercultural Publishers,  
Paris: Unesco Collection of Representative Works,  
1995.

Laba tallaabo dhexdood baa talo ka dhalataa.  
Két lépés közt születik a megoldás.

Maal yar iimaankaa lagu kabaa.  
Gyér javaid szerénységgel gyarapítsd.

Dib u gurashona, dib bey kuu dhigtaa.  
Az elkésett lépés – hátralépés.

Nin faruurey ah siraad ma bakhtiyo. / Faruurey ma fooliyo.  
Nyúlászajjal aztán fújhatod a lámpást.

Farihii dufanleh ayaa wax duuga.  
Csak olajozott kéz masszíroz jól.

Qosol badani, qoonsimaad buu leeyahay.  
Gyakori viháncolás gyanakvást ébreszt.

Nin is amaanay, waa ri is nuugtay.  
Az öndicsérő olyan, mint a magát szoptató kecske.

Nin farsamo-xumi, gacmihiisuu canaantaa.  
Ügyetlen míves szerszámát okolja.

Nin kastoo meesha bukta isagaa og.  
Ki-ki maga tudja legjobban, hol vizket.

Xasidow xoogga beel.  
Aki kíméli magát, a gyengeségbe hal bele.

Timir laf baa ku jirta.  
Minden datolyában van egy mag.

Ood iswadaqabsatey maroodina way qarisa.  
Sűrű bozót elefántot is elrejt.

Caleen qudhac calool geel wax kama tarto.  
A teve bendőjét egy szál akácia-level nem tömi meg.

Nin faas leh goryo ma waayo.  
Kinek fejszéje van, fát is talál.

Fallaadhi gilgilasho kaagama go'do.  
Ha már húsodban a nyíl, hiába minden ugrándozás.

Irrid af madaboole ee oodba daboosha.  
Tövissel torlaszold el az ösvényt, ne szóval.

Markey bookta reysataa, takhsinguna tagaa.  
Mihelyt behegedt a seb, elszállnak a legyek.

Lacagna lacagbey dhasha injirna qandhicil.  
A pénz pénzt fiadzik, a tetű serkét.

Barasho u yeelo geedkaad cuskan doonto.  
Ismerd ki a fát, mielőtt neki támaszkodsz.

Hurdo cagahay ka bilaawataa.  
Lábod álmosodik el legelőbb.

Birbaa bir goysa.  
Csak vas vág vasat.

Xaabo waxaa la doontaa, qorraxda soo jeedo.  
Még napsütésben keress tűzifát.

Far keliya fool ma dhaqo.  
Egy ujjal nem lehet arcot mosni.

Luqun dheeraatay, madax ma dhaafto.  
A leghosszabb nyak se növi túl a fejet.

Nin waliba intay taagtiisu tahay, ayaa qodaxdu ugu tagtaa.  
Minél súlyosabb a lépted, annál mélyebbre szúr a túske.

Wax aan gacantaada ku jirin iyo afkaagu waa kala raagaan.  
Amit nem fog meg kezed, szád hiába várja.

Dheg haddii la gooyo, daloolkaa hadha.  
Levághatod a fület, lyuka megmarad.

Waxay ili aragto yaa ilko gooyaan  
Szem meglátja, fog harapja.

Carrab iyo ilko iyaga inta kale isaga dhow, iyagane waa isqaniinaan.  
A nyelv van legközelebb a foghoz, az mégis belemar.

Dudumo dheeraataa dhulkay ku soo noqotaa.  
A természet teteje is földre dől egy nap.

Hilib hal diqsi baa qurmiya.  
Egy légy nem rohaszt húst.

Rida adhi kahartada ah shabeelka la hara.  
Utolsó kecskéd leopárd falja fel.

Libaax aan dhiig dhadhamin ma ciyo habeen.  
Oroszlán, míg vért nem ízlelt, nem bömböl az éjszakában.

Mallay maanyo ku jiro dheri looma saarto.  
Tengerben úszó halnak ne tégy fazekat a tűzre.

Mallay intaas dufin aa la kariya.  
Halad, ha van, süsd meg tüstént.

Faras aanad lahayn fuul ma diisa, futaqarradh baa laga qaadaa.  
Idegen lovon megfájdul az üleped.

Waraabe ul lala gaadhiwaa, afna waxba lagaga guriwaa.  
A hiéna, míg botoddal el nem éred, szitkozódásodra rá sem hederít.

Lax gowracan maqaar-siib kuma xanuunsato.  
Levágott báránynak nem fáj a nyúzás.

Dulqaadasho yey noqon tii dibiga.  
Zsarnokság alatt csak az ökör türelmes.

Abkey doolli dilow, dad nool maas u daahaa?  
Miután a gyáva egeret ölt, tétovázik-e, hogy embert öljön?

Laabta low ma aha, hadba la laalaabi karo.  
A kebel nem könnyen hajló térd!

Qoryo adistooda isku duwid baa horreysa.  
Aki rőzsét gyűjt, egy nyalábbal kezdi.

Weylasha biree dibigu ha ku quustee.  
Ha figyelmeztetni akarod a borjút, szeme előtt taglózd le az ökröt.

Daawo tiro wax kuma tarto.  
Az orvosságnak nem a mennyisége gyógyít.

Mindi aad u afbadan gacantii lahayd bey goysaa.  
A túl élesre fent kés megvághatja a tartó kezét is.

Gees lo'aad kulaylka lagu gooya.  
Addig nyisd le a marha szarvát, amíg forró a késed.

Dameer waa dameer sidii goodirkaba ha u boodee.  
Szökellhet, mint antilop, a számár számár marad.

Biyo badeed beer ma waraabiyan.  
Tenger vize helytelen a szántóföldön.

Rabid iyo rajo waa weel aan buuxsameen.  
Vágyak és remények edényét soha nem lehet csordultig tölteni.

Xoolo suuqa loo sido hantinimey sadshaan.  
Aki a legelőre hajtja csordáját, nem a piacra – gazdag ember.

Baahi waxay kuu geysaa nin kuu daran.  
Az éhség ellenségedig elhajt.

Waxaan ku cunniba waa la cunaa.  
Szükségben bármit megehetsz, ami nem esz meg téged.

Illin la qubey, deen laguma qaan-gudo.  
A kölcsönt nem könnyel fizetik vissza.

Baahi balaayey ku talisaa.  
Az üres has rossz tanácsadó.

Ruux saddex malmood qatan, looma cabsoodee waa laga cabsoodaa.  
Aki három napja nem evett, azt semmi sem tartja vissza.

Juuni eber ah ma istaago.  
Az üres zsák nem áll egyenesen.

Saboolka iyo geerida aqal beywada degaan.  
Szegény ember egy kunyhóban hál a halállal.

Ishii sartiir u muqataa, seexata.  
Ágyat lát a szem, és elálmosodik.

Calool bukta iyo weji furufuran laysku waa.  
Ha fáj a hasad, arcod se vidám.

Nin geel lumay baadi goobaya, (wax kale daaye,) weel buu ka eega.  
Még a fazékban is elveszett tevéjét keresi.

Haddii la modiwayane, waa la muusa.  
Ha nem kerekedhetsz fölé, kerekedj alá.

Dhadhan-biyo, meel oon lehaa lagu bartaa.  
A víz igazi ízét csak a sivatagban érezhetni.

Kabo-tole kaba la'aan buu socdaa.  
Minden varga meztől jár.

Kibirka qaarki waa lagu kufaa.  
Bukás előtt büszkeség jár.

Maroodi, ka xoogbadan, habaar laguma dilo.  
Elefántot nem öl az átok.

Labo lugood lagama dhutiyo.  
Két lábra nem lehet sántítani.

Meydka waa la aasaa, warse waa aasmi kariwaye.  
A holttest elásható, de a szóbeszéd nem.

Laba biyo kulul isma qaboojiyaan.  
Két adag forró víz nem hűti le egymást.

Ishii laga arko ushiisa lagu tumaa.  
Ha félelmet látsz a szemében, saját botjával is megütheted.

Haddaad aragtid nin calooshu ka soo jeeddo, ha siin jid, intii kii kale ka aragtid.  
Ne sajnáld a súlyos sebesültet, amíg nem láttad, hogy néz ki az ellenfele.

Guryihii usu dhow baa is guba.  
Közeli kunyhók közösen égnék.

Maroodigu takarta ku joogta ma arkee, tan kan kale ku joogtuu arkaa.  
Az elefánt ugyan nem látja a szúnyogot saját hátán, de észreveszi a másikén.

Guriga ma gadine, jaarkiis baan gaday.  
Ha házat veszel, megveszed a szomszédokat is.

Walaal ka fog, deriska ku dhaama.  
Jobb egy közeli szomszéd, mint egy távoli testvér.

Dhagax iyo ukun meel ma wada galaan.  
Nem tesznek tojást kővel egy zsákba.

Nimaan dhul marin u dhaayo la'.  
Aki nem járt külföldön, nem beszél csodákról.

Tikhsi iyo quran, meelbey wada galaan.  
Ahol a legyek, onnét a bűz.

Tuug hurdo, waa mid horaan wax u qaatey.  
Alszik a tolvaj: biztonságban a zsákmány.

Waa kacey ha oran haddaadan cagahaaga ku tagneen.  
Ne hoppázz előre, csak ha már ugrottál.

God intaad ka carareysid ceelka ha ku dhicin.  
Elfutsz egy gödörtől és beesel a kútba.

Wixii tataabasho laga badiyaa, wasakhooba.  
Amit folyton fogdosnak, bepiszkolódik.

Naxariistaba marmarbey ka dartaa.  
A kegyelem néha kegyetlenség.

Waabayo mas baa maseeyr dhaanta.  
A kigyóoméreg is jobb a féltékenységnél.

Harag kasta la ciddiisa xoqi taqaan.  
Saját körmöm vakar meg legjobban.

Dab cagtii ku joogsatuu gubaa.  
A tűz csak azt a lábat égeti, amelyik eltapossa.

War la qabaa xiiso ma leh.  
Amit mindenki ismer, arra senki se kíváncsi.

Ka barey, ka badi. / Laga barey, la badi.  
Akit tanítasz ma, tanítód lehet holnap.

Ilko caanood cunto laguma calaasho.  
Az első foggal még nem lehet rágni.

Dawac aqalkiisa jooga aar buu is mooda.  
Saját házában a sakál is oroslán.

Nin il-la', Ilaah kuma mahadiyo, ilaa indhoole ka hor ximaado.  
A félszemű nem hálálkodik Allahnak, amíg vakot nem lát.

Dal dadkiisu libaaxyeenayo haddaad tagto, sidi riyaha looma soclo.  
Ahol mindenki az oroslánt utánozza, ott nem utánozhatod a kecskét.

Meel biyo badan ninkii dego, waa inuu dabaal barto.  
Aki vízparton lakik, megtanul úszni.

Dhimbishaa dabka laga raadiya.  
Parazsat hamuban keress.

Raggane dhugga, ratiga ilkaha laga eegaa.  
Tevének a fogát nézd, embernek a józan eszét.

Ninkii laba naag qabaa, afar gacmood dilaan.  
Aki két feleséget akar, négy kézzel veressék.

Laf iyo miro ninaan ilko laheen baa Ilaah u deeqaa.  
Diót és mandulát ad Allah annak, kinek foga nincsen.

Darur kasta ma da'do.  
Nem minden felhő hoz esőt.

Fudeed baa dabaysha raaca.  
Ami könnyű, a szellő is elfújja.

Weerka waa dhogor dhacsadaa, mase dhaqan rogmo.  
A hiéna irháját váltja, nem a természetét.

Labo ma dhargaan: cilmidoon iyo hantidoon.  
Ketten soha le nem ülnek: aki tudásra vágyik és aki gazdagságra.

Mukulaal hilib siin la barey, ma qabsato hawsheeda.  
Éheztesd a macskát, és megeszi az egeret.

Bad beer lagama tacbado.  
Tengerbe ne vess magot.

Xasuus-xumi waa cuduran daawo laheen.  
Feledékenységre nincs gyógyír.

Waxaa tahay, hooskaaga lagama tixraaco.  
Ne az árnyékodon mérd le nagyságodat.

Garasho waxay seegta kaan waxba weydin.  
A legtudatlanabb az, aki kérdezni se tud.

Meel maskax looga bahanyahay, murug wax kama taro.  
Ahova ész kell, oda hiába az erő.

Dharaartina il, habeenkine dheg.  
Nappal a szem, éjszaka a fül.

Calool xil ma garato.  
A gyomor mit sem tud a kötelességről.

Ruuxi dabka qaata, qiiqana heysta.  
Veszed a tüzet, viszed a füstöt.

Suge ma dhinto ee dharare ayaa dhinta.  
A türelem nem öl, csak a sietség.

In la filo ma xuma, in la suga daran.  
Remélni jó, várni rossz.

Adduunka waa laba malmood: malinne adaa leh, malinne waa laga lehyahay.  
Két nap a világ: egy nap érted, másnap ellened.

Wixii caloosha kaaga jiraa carrabkaa kaa xada.  
Amit szívedbe rejtesz, nyelved gyakran ellopja.

Kuu sheekeeye, ka sheekeeye, lalama sheekeysto.  
Vigyázz! Ki hírt hoz, visz is.

Dundumooyinkoo lala hadlaa damac ma yeeshaan.  
Termesztvárnak hasztalan szónokolsz.

Carrabkaaga ka adkaw, intusan ka adkaan.  
Tartsd fogva a nyelved, vagy ő tart fogva téged.

Ili subag ma dhuugdo.  
Kellemes beszélgetés utat rövidít.

War aan murti laheen waa laga aammusa.  
Ostoba beszédre hallgatás a felelet.

Aammusnaanta qaakeed waa oraah.  
A hallgatás néma beszéd.

Af-ka-shegne waa duula, qoraalna waa waaraa.  
Mint a nyílvesszó, elrepül a szó, de az írás megmarad.

Xanuun waxaa ugu daran kaan la sheegi karin.  
A legnagyobb kín, amiről nem szabad beszélni.

Carrabka muxuu madax badan tirka togashada geeyey.  
A nyelv bitóra juttatja a főt.

War tiro ma leh, ee misaan buu lahyahay.  
A szavakat mérlegelni szokás, nem számolni.

Af aammusani, marti ma sado.  
A szótlán száj nem jó házigazda.

Af wax cunay xishoo.  
A jól táplált száj retteg a bírálattól.

Foori duqnimo lagu barta afkey faruuriisa.  
Öregen fütyülni tanulni: csak a szájadat torzítja el.

Gacan iyo af la islama waayo.  
A kéz nem téveszti el az utat a szájig.

Gacantaad goyn karin wa la dhunkooda.  
A kezét, mit harapni nem tudsz, csókolnod kell.

Boqol u taliye, boqol ul buu sitaa.  
Aki száz embernek parancsol, százféle botot vágjon.

Habraha markey nin xasuustan, aroos hore ka sheekeya.  
Ha a vénasszony sórakovni akar, a mennyegzőjéről mesél.

Nin waalan hadduu aammuso, kuwa miyirka leh baa lagu tirshaa.  
Ha a balga hallgat, bölcsnek gondolják.

Ruxii aroos kastoo gogjoog ka ah, ayaa geeri kastane laga helaa.  
Aki mulat minden nászon, gyászolhat minden temetésen.

Wax waa la fiiriya, lagumase indha-kuuro.  
Nézni szabad, bámulni nem.

Arrin saddex ogtahay, qarsoodi ma gasho.  
Amit hárman tudnak, nem titok.

Jiilaalka iyo ninku way legdamayaan, kolba ka naagtu raacdaa adag.  
A száraz évszak és a férfi küzd egymással, de az asszony dönti el, ki a győztes.

Hadday fooli timaaddo, gudaqarsiimo hadhay.  
Amikor bába lép a kunyhóba, a szégyen kitakarodik.

Fuley habartii ma gablanto.  
Gyáva gyerek nem vész el.

Ruux waliba wuxuu hooyadii la yahay hal madheedha.  
Minden anyának saját gyereke a legszebb.



Nin aan hadlin habartiina wax ma siiso.  
Aki nem nyitja ki száját, még anyjától se kap semmit.

Reer wax wada cunayo xeradoodu ma qabowdo.  
Ha sok gyerek eszik együtt, nem hűl ki az étel.

Dumar iyo carruur baa laysma ciyaar baro.  
Gyerekkel és nővel ne nagyon tréfálkozz.

Xubno, farahaa isku gudhow, iyagana ma sinna.  
Bár egy sorból való, még az ujjak sem egyformák.

Ninkii aabbihii ku caasiyo, carruurtiisu ka arkana.  
Felnőtt gyerekeink megmutatják, milyen mostohán bántunk apánkkal.

Duqqa waa cirbaddii dadka isku toleysey, duqdana waa mindidii kala goyneysey.  
Az öregember tű, mely összetart; az öregasszony kés, mely széjjelvág.

Laanta toosi intey curdun tahay.  
Addig egyenesítsd a fát, amíg fiatal.

Adduun-la'aani waa addoonnimo.  
Nincstelenség: rabszolgaság.

Dhallaanka libaaxa waa libaax.  
Oroszlánnak kölyke is oroszlán.

Carruur lays ciyaarbaray, addoon bey ku moodaan aabbo u soo iibshey.  
Ha gyerekekkel játszol, hamar apjuk rabszolgájába vesznek.

Carruur cirridkaaga lama tuso.  
Gyerekeknek ne mutasd az ínyed!

Cunug fiyow, hooyo ficaan.  
Egészséges gyerekek, jó anyák.

Ninkastaba naag baa furo u ah.  
A férfi kulcsa a nő.

Carruuri way ooyda markey kufaan, markaad kuftase way qoslaan.  
A gyerekek sírnak, ha elesnek – ha te esel el, kinevetnek.

Iimaan waa uur muggii.  
A mértékletesség teli hassal felér.

Ceelka ninne waa qoda, boqolna waa ka warabtaa.  
Kutat ás egy, iszik belőle száz.

Xoolahaaga ceebahaa qariya.  
A gazdagság eltakarja hibáinkat.

Hadal badan dan baa dhaanta.  
Keveset tenni is több a sok beszédnél.

Tifiq tifiq biyo ah baa weelka buuxsha.  
Cseppenként telik a tál.

Cunto lahela calooshiis la ciyaar ka dhigtaa.  
Ha a gyomor tele, egész testünk örül vele.

Hanti iyo qaraabo ma qarsoomaan.  
Rokont és pénzt nem lehet rejtegetni.

Saddex waxyaalood waa wed-ka-koris: dabaal-aqoon, orod dheeri, gabasho-aqoon.  
Három módon menekülhetsz a haláltól: ússzá! fussál! bújjál!

Geridu kolbey nolosha dhaantaa.  
Néha a halál kívánatosabb, mint az élet.

Nin dhintay, kabihiisaa dhaama.  
Ha meghalt, húzzuk le a cipőjét.

Nin ilkaweyni hadduu go'ayona, inuu qoslayaa la moodaa.  
A nagyfogú haldokolva is nevetni látszik.

Geesi kol buu dhintaa, fuleyna kun jeer.  
A bátor egyszor hal meg, a gyáva számtalanszor.

Ninkii qorrax kugu diley hoos kuuma jiido.  
Aki megöl tűzű napon, nem húz árnyékba utána.

Hurdo iyo geeri waa wada dhasheen.  
Alvás és halál unokatestvérek.

In wax la dhalo waa gaashankii geerida.  
Halál ellen legjobb szülni.

Sidii god la qodey, sugid badanaa.  
A csapda nem fárad bele a várakozásba.

Geeri ka dib toobad wax matarto.  
Halál után minek a büntetés.

Cudur cirro kulama sugo.  
A betegség nem vár addig, míg megőszülsz.

Wiilne muruq buu mujiyaa, wayeelne maskax.  
Fiatal ember az erejét fitogtatja, öreg ember a bölcsességét.

Noloshane gabar ha ku weheliso, geeri wiil ha ka horo.  
Egy fiam, ha meghaltam; egy lányom, míg élek.

Aar duqoobey, eydaa ka madeysata.  
Oroszlán, ha megöregszik, a kutyák kinevetik.

Aar dhintey eey nool baa dhaama.  
Jobb egy élő kutya, mint egy döglött oroszlán.

Mindidaba waqtigaa aftira.  
Még a kés is tompul a korral.

Hanti iyo hanti la'aanba xabaal waa loo simanyahay.  
Egy temetőben nyugszik gazdag és szegény.

Allow mar uun saare ii qaad inta kalese anaa ku filan.  
Isten segítsen felfelé, lefele magam is elboldogulok.

Dhallaan dhacayo, malaa'igta u faraqdhigato.  
Mikor elesik egy gyerek, angyal tartja alá a kezét.

Ninkaan baqin waa loo baqaa.  
Félted, aki nem félt!

Haddii Ilaah irrid ka xiro, irrid kale ayuu ku furaa.  
Mikor Allah bezár egy kaput, rögtön kinyit egy másikat.

Ilaah markuu wax ku siinayo abtirso kuma yiraahdo.  
Ha Allah ad neked, nem kérdi szüleid nevét.

Illah nolol dadka waa ka wada simey, caqlise kama wada siimin.  
Allah életem mindenkinek ad, de értelmet nem mindenkinek.

Waxa wayeelka fadhiga ku arko, dhallinyaro istaaga kuma arkaan.  
Amit az öregember ülve is meglát, a fiatal állva se látja.

Waxii horeyne aragney, waxxa inoo dambeyna waa ognahay, inta u dhaxeysa inoogu daran.  
Tudjuk a kezdetét és tudjuk a végét, csak attól félünk, ami közte van.

Geela duqdiisii durdurisay, aarankiisana maxad mooday.  
Ha az öreg tevék otthagyják a legelőt, maradni a fiataloknak se tanácsos.

Hadduu magacu ka xumaado, maal qabeen wax kuuma taro.  
Ha oda a jó híred, javaid se szerzik azt vissza.

Jinni ninki keeno isagaa bixiya.  
Aki szellemet idéz, szellemet űzni is tudjon.

Ballan-gal waa eed-gal.  
Minden ígéret adósság.

Talada dadkane qaado, taadane ku soco.  
Minden tanácsot hallgass meg, de csak a magad feje után menj.

Ninki dameer aqal-dushi saaro, soo dajuntiisane waa mid laga sugayo.  
Aki hagyja a szamarat fölmenni a tetőre, hozza is le.

Geedka weynba gudin yarba gooysa.  
Akármilyen nagy fa, kivágja a kisbalta.

Ninne hooskiisa kama dheereyo.  
Nem érsz tovább az árnyékodnál.

Sirtaada waxaad xukunta intaadan shegin, mar haddey ka baxsato iyadaa ku xukunto.  
Rabod a titok, míg megtartod magadnak, de rabja lesz, mihelyst másnak is elárultad.

Hunguri sida kula habboon, xarragana sida dadka la habboon.  
Edd, amit szeretsz, de öltözz abba, amit mások szeretnek.

Hal diidadaysaa, geed ay ku xoqato ma weydo.  
A csordától elcsatangolt tevekanca mindig talál egy fát, amelynél vakaródzhat.

Walaalo dagaalamayo lamo dhaxgalo.  
Testvérharcba ne avatkozz, mert mindkét fél ellened fordul.

Tuksi waa tabarta ceyrta.  
Szegény ember ereje a koldulásban van.

Mukulaal ma mooga meeshii laga mamulayo.  
Még a macska is jól tudja, merre a konyha.

Shimbiir kastoo oo bubto, risiqeeda dhulkass yaal.  
Még az égi madár is a földben keres gilisztát.

Inta buufimo taal, biri ma qaboobin.  
Addig izzik a vas, amíg fújtatod.

Lo'-jire ushii saciisa ma disho.  
A pásztor botja nem üti agyon saját jószágát.

Hal aan weli kuu dhallin, ilmaheeda ha tirsan.  
Meg nem született borjút ne számolj a csordához.

Rida ammaanada ah lagama soco arigaada.  
Ha kecskét bízna rád, tartsd a sajátoddal.

Nin durbaan qaatey, cilaaq dalbay.  
Aki veri a dobot, akar valamit.

Rag muraadli'i meel waa u maraa, muraadli'ise meel uma fadhiyo.  
Futkározni lehet céltalanul is, de leülni nem.

Shabeel aanad dilin haraggii ha iibin.  
El se ejtette a leopárdot, de már árulja a bőrét.

Haddaad magaalo laga wada il-la' yahay timaaddo, il baa leyska ridaa.  
Vakok városában vágd ki fél szemed.

Dheri la kor taagan yahay ma karo.  
Ha sietős a főzés, a fazék is hátráltat.

Diinka maduxu dikamiyaa, mase dagaalomo.  
A teknősbéka csak fenyeget, de nem harcol.

Maroodigaba kama daalo ilig dheer inuu sido.  
Agyarát hordozni nem fárad el az elefánt.

Maroodiga iligiisa dhaamo.  
Az elefántfog értékesebb az elefántnál.

Ninkii weyshaada dilo, aduu ku danleyahay.  
Bár a borjút üti, a gazdának szánja.

Tababar bidixda intey midig ku fiyowdahay.  
Addig képezd a balt, míg megvan a jobb.

Derin haddi lagu fidsho, docba looga fariistaa.  
Ha a főnök gyékénnyel kínál, csak a szélére ülj.

Fartaada xun filiq-filiq kagama harto.  
Ujjunk, ha piszkos, azért le nem vágjuk.

Qofkaaden qanini karin, ilkaha lama tuso.  
Harapni képtelen, ne mutasd a fogad.

Ruxii hoos wax ka doonayo waa inuu hoos dhugtaa.  
Ha kell valami az ágy alól, hajolj le érte.

Ninkii dameer ku soo raro waa inaad rati u rartaa.  
Ajándékot szamárháton, viszontajándékot teveháton.

Madaxi loo xiirayo meel kasta loo jeedsha.  
A fej, melyet borotválász, parancsodra hajlik.

Waxaan la heleenba loo hunguriyaa.  
Az ember azt kedveli, amit megtagadnak tőle.

Nin doonaa dad wada qumman, dad la'aan buu mutaa.  
Nem találsz barátot, ha hibátlan embert keresel.

Nin fiicanba, ninba ka sii fiican.  
Mutass egy jó embert, és mutatok egy jobbat.

Wiilkaaga walaal kalahaw, walaalkaadana wiilal ka lahaw.  
Fiad ellen támaszkodj testvéredre és testvéred ellen támaszkodj fiadra.

Qosol waa cadaygii afka.  
A nevetéstől kitisztul a szád.

Waraabe iyo cawl heshiis dhaxmariwa.  
Antilop és hiéna sosem lesznek barátok.

Gacmo iyagaa is xala.  
A két kéz egymást mosdatja.

Ereyga hufanbaa irridkasta fura.  
Udvariasság minden ajtó kulcsa.

Bakoorad ka dheer balad looguma wareego.  
Ne vigyél magadnál magasabb sétabotot.

Ninkaan col laheenbaan, darbi laheen.  
Nincs kerítésed, nincs ellenséged.

Nasiib layskuma dhafo, dadaalba lagu daraa.  
A szerencse sem segít, ha nem segítesz magadon.

Beenu waa lug gaabantahay.  
A hazugságnak kurta a lába.

Ruux kastoo runta waa jecelyahay, ruux kastaase ma sheego.  
Mindenki szereti az igazat, de nem mindenki mondja ki.

Weelba war toosan loogu tagaa.  
Görnyedt kor, egyenes beszéd.

Waa calaacasha timo ka soo baxaan.  
Majd ha szór nőtt a tenyerenen...

Nin in la dhageysto doonayo, bubaankiisa lama gambado.  
Ha hallatszani akarsz, ne a szőnyeg alatt dobolj.

Been waddo waa ku gudbiisa, kumase soo laabto.  
A hazugság messze eljuttathat, de vissza sohasem.

Beenlow waxa sira xasuus xumi.  
A hazugnak legyen jó az emlékezete.

Xariir kastoo la dulsaaro, dameer waa dameer.  
A számár selyemben is számár.

Ul qalloocan mayeelato hoos toosan.  
Görbe botnak árnyéka sem egyenes.

Ninkii iskala daadsho, dooradaa ku kor tumato.  
Aki korpát csinál magából, szétkapirgálják a csirkék.

Gurbaan dharwaaqi meel dheer buu ku habboonyahay.  
Messziről szól szépen a dob.

Tuug waxa ah kii wax lagu qabtu.  
Csak az tolvaj, akit elkapnak.

Ninkii labo wado doonayo midne ma gaaro.  
Aki kettőt akar, egyet sem kap.

Haan faro-maran baa forforisa.  
Üres köcsög jobban csörömpöl.

Awarka sonkorne waa sidaa, qodaxbuusa ka daqaa.  
A teve cukornádat hord, de tövist eszik.

Ratigoo dhumey, reeryo lama radsho.  
Aki tevét veszített, nem nyerget keres.

Qaylo gar dhowaysay.  
Az igazság azt szolgálja, aki hangosabban ordít.

Ratigi haddaad rari kari-weydo, heeryo rati looma eedo.  
Ha nem bírsz a tevével, ne a nyerget hibáztasd.

Ruuxii wax kasta doonayo, waxba ma gaaro.  
Mindent akarva, mindent elveszt.

Dhagar qabe dhulkaa u dhaqaaqa.  
A rossz lelkiismeret csúszós padlón áll.

Ninkii tuug qarsho waa tuug.  
Aki tolvajt rejteget, maga is tolvaj.

Tuug wax ka tuhun badan.  
A tolvaj mindjárt mást gyanúsít.

Odey gar loo xilsaarey waa carrab ilko dhaxyaal.  
A bíró olyan, mint fogak közt a nyelv.

Dayintii gacantu bixisey lugtaad ku radisa.  
Amit kézzel adsz kölcsön, lábbal kell visszakeréned.

Diiq qeyliyey, isagaa dawaco u yeertey.  
Kakaskukorékolás a sakál jelzőpóznája.

Dadkii hilib ceyriin ku qeybsadey kuma doodaan mariqiisa.  
Aki el tudják osztani a húst egymás közt, azok nem veszekednek a levesen.

Beenaale markhaatigiisuu fogeeyaa.  
A hazug tanúi messze laknak.

Addoonsi cabsi buu ka abuurma.  
A veszély a félelmen keresztül tesz rabszolgájává.

Far haddaad qof ku fiiqdo, afarta kale isku beeg.  
Míg egy ujjal mutogatsz valakire, másik négy ujjad magadra mutat.

Foojignaasho fuleynimo ma aha.  
Az óvatosság nem gyávaság.

Min haddaad soo gasho, meeladayday lama noqdo.  
Ha idegen kunyhóba lépsz, tartsd vissza kíváncsiságod.

Macal cune soo bixo donee.  
Aki túl sokat eszik, soká nem titkolhatja.

Kelidiicune kelidii buu dhintaa.  
Aki mindig egyedül eszik, halálára is egyedül marad.

Ilig bolol ah baa af qurmuya.  
Egy rossz fogtól az egész száj bűzlik.

Dab nin ku gubtey, dambas waa ka cabsada.  
Aki megégette magát, a hamutól is fél.

Dab shidan lama afuufo.  
Parázsló tüzet nem kell legyezni.

Nin daad qaaday, xunbo cuskay.  
Akit elsodort az ár, a habba is belekapaszkodik.

Nabar la filayey, naxdin ma leh.  
A félt csapás nem ijeszt meg.

Is-qariye ma qufaco.  
Aki bújik, ne köhögjön.

War iyo dab baa dabeyshaa qaada.  
A tüzet és a szót viszi a szél.

Ninkii Ilaah naceeb yahay wuxuu siiyaa afo dhibley ah.  
Akit Allah büntetni akar, rossz feleséget ad neki.

Gaf waxa u weyn gafafka dadka kale.  
Mások hibáit nagy betűkkel írják.

Miraha lafta leh iyo ruuxa amaanta badan isku si baa looga digtoonaadaa.  
A hízelgést és a magvas gyümölcsöt vigyázva élvezd.

-----  
A szomáli nyelvet 1972 óta hivatalosan a latin ábécé betűivel írják,  
de sorrendjük az arabot követi:  
' , B, T, J, X, KH, D, R, S, SH, DH, C, G, F, Q, K, L, M, N, W, H, Y, A, E, I, O, U.

kettős magánhangzó = hosszú magánhangzó

Variációk és további közmondások szomáli nyelven (latin ábécérendbe szedve):

## Maahmaahyada iyo Oraahda Soomaaliyeed

Szomáli közmondások és szólások  
Proverbs and Sayings of the Somalis

Nudeenno (Links):

<http://www.somaliroots.com/maahmaah.htm>  
<https://web.archive.org/web/20091027114700/http://www.geocities.com/abdi68/images/maahmaaho.htm>  
<https://web.archive.org/web/20120819020756/http://shunuuf.tripod.com:80/maahmaah.html>  
[http://kapchits.narod.ru/main\\_en.htm](http://kapchits.narod.ru/main_en.htm)  
<http://web.archive.org/web/20000118014207/http://somalinet.com/Literature/prov.shtml>

Maahmaahda Qaybta "A" ka Kacda

1. Aadme la aragyaaba, dhib la arag.
2. Aan wada hadalno waa aan heshiino.
3. Aar qoyey dacawo la mood.
4. Abaal dad galaa badan, dad gudaase yar.
5. Abaal raaga rag baa leh, mid baaqdana haween baa leh, mid soo dhakhsadana xoolaa leh.
6. Abeesada taan sanqarta iyo tan aammusan, tan aamusana baa la qaatay.
7. Abeesana dhul u eki bay wax ku dishaa waadaadna dad u eki.
8. Abgaal calool la deguu leeyahay, ee cidhif la dego ma leh.
9. Abkeey dooli diloow, dad nool maas u dahaa.
10. Aburku inta aanu kugu tufin ayaa lagu tufaa.
11. Aburku intaanu kugu tufin, baa lagu tufaa.
12. Abuur iyo waano abuur baa horreysey.
13. Adduun i khatal.
14. Adduunyo ka kabo li'id, aakhirana u salaad li'id.
15. Adhi been wuu didaa beense ma dhutiyo.
16. Adhi jiri ma kala abaal waydo.
17. Adhi jiri xil bay wadaagtaa.
18. Adhi magantii ma barriyo.
19. Adhi shidho laga daayo.
20. Adhi-jiri ma kala abaal weydo.
21. Adin waa la dhibaa, ilna waa la dhawraa.
22. Adoo nabad u balawaara, beloy kaalay lama yari.
23. Aduun wey ki amoo deey ogaaw.
24. Af aamusani marti ma sedo.
25. Af aanad aqooni aabahaa wasna waa kaa yeedhsiiyaa.
26. Af aanad lahayn ileen aamus lama dhaho.
27. Af aanad lahayn lama qabto.
28. Af ama reer aw mahdi ha ku hadlo ama lo' ha ku daaqdo.
29. Af daboolan dahab.
30. Af Daboolan, Dahab waaye.
31. Af hadlaaba aamus.
32. Af jabtay sideedii ma noqoto.



33. Af jooga looma adeego.
34. Af macaan gacan macaan baa dhaanta.
35. Af nooli waa hadlaa Eyna waa ciyaa.
36. Af noolina waa hadlaa eyna waa ciyaa.
37. Af waa kane, maxaa lagu aamaa.
38. Af wax cunay xishoo.
39. Afar gacmood abaar ka daran (Hunguri weyni waa cudur).
40. Afar layskuma daro: Waan guuri; Waan guursan; Geel baan qaadi; Geenyaan gadan.
41. Afar waa afar: Noloshu waa Niyad; Naftu waa qaali; Nacaybku waa olol; Nabsigu waa qaraar.
42. Af-ka nool abooto mudac.
43. Afkaad goojaamo kaga keentay kula hadal.
44. Afkaagoo ku xidha oon ku furin alle goo baa la yidhaahdaa.
45. Afkii dab yiri ma guban.
46. Afxumo nabad way kaa kaxaysaa colaadna waxba kaagama tarto.
47. Ag-joog, Ninkii xilo doonayowna Xamaro agjoog.
48. Alif kaa xumaaday Albaqra kaama haro.
49. Alla aamin ma iisho.
50. Alle watow wehel uma baahna.
51. Allow aqoon xumo hannagu caabin eexona hannooga tegin.
52. Allow nin aan wax ogeyn ha cadaabin.
53. Ama afeef hore lahow ama adkaysi danbe.
54. Ama faro dufan leh ku qaad ama faro dac leh.
55. Ama waa la muuqdaa ama waa la maqanyahay.
56. Ammaan lama dhu-dhumiyo.
57. Ammaano cirkaa diiday, oo dhulkaa diiday, oo Aadmi baa qaatay.
58. Ammaano kugu raagtey inaad leedahay baad mooddaa.
59. Amxaar la arag yaaba ferenji xaaji.
60. Amxaaro madax gumac galay leedahaye madax hadal galo ma laha.
61. Aqal libaax lafo lagam waayo.
62. Aqoon la'aani waa iftiin la'aan.
63. Aqoon xumo abaar ka daran (qorsho xumo abaar ka daran).
64. Arin nin la toosan ayaa nin kale tuur la leh.
65. Aroos lagama raago, lagumana raago.
66. Arrad waa dan uskagse waa doqonniino.
67. Arrimo rag waa mudacyo afkood.
68. Arrin aan sidii futo riyaad la feydin, ma fayooabaato.
69. Arrin kaa tagtat Ahaa sooma celiso.
70. Arrin waa mid kugu soo booddiyo, mid kugu bariday.
71. Arrin xumo abaar ka daran.
72. Atoorku intiisuu guun ku yahay.
73. Awr awr wado iyo nin naagi waddi midna kaama leexdaan.
74. Awr kala guurtay uurar kala guurey baa ka xun.
75. Awrba awrka ka horreeya ayuu horraan-qaadkiisa leeyahay.
76. Awrka danbe awrka hore socodkiisuu leeyahay.
77. Ayax teg eedna reeb.
78. Ayaydaa taag darran iyadoon tabar lahayn bay dadka isku taagtaagi.

#### Maahmaahda Qaybta "B" ka Kacda

1. Baadi nin aan lahayn bay agjoogtaa.
2. Baahiyo qof kuu daran bay kuu geysaa.
3. Baareey guur, oo sixnigaagana la guur.
4. Baddu waa isku dhadhan.
5. Badhi mag ma laha.
6. Balaayo laba qad ha kuu jirto.
7. Balaayo madax la qabtay leedahaye minjo la qabto ma laha.
8. Balaayooy buulkaagaa laga galaa.
9. Ballan habeenimo, jarmaado subax buu leeyahay.
10. Ballaysin bir ka adag.
11. Ban waraabiyo gaala baqataba baraa la helaa.
12. Bannaankaba arkaayow maxaa babac ku saaraaya.
13. Bannaankiis mare maradiisa geed ma qabsado.
14. Baqal fardo la miratay dhigood bay is moodaa.
15. Barasho horteed dad ha nicin.
16. Barasho horteed ha i nicin.
17. Barasho u yeelo geedkaad cugsan doonto.
18. Bari waaga mooyee wax san kama yimaadaan.
19. Barooriba buulkeeday ku hartaa.
20. Bartii yaqaan, bari uma korodho.
21. Bartii yaqaannbar xoolaad kuma korodho.
22. Baruur qudhuntay baa baruuro badan qudhmisa.

23. Baruuuro sabool, badhaadhaa leh.
24. Baryo badan iyo bukaan badanba waa laysku naca.
25. Baryo iyo is daluuc layskuma daro.
26. Basari buulkeeda bayaayo waaye.
27. Baso waa baso si kastoo loo subko.
28. Bawdo rag, maalinba midbaa qaawan.
29. Beec-mushtar bilowgiis bur iyo bajiye waaye.
30. Been doode been buu dhaartaa.
31. Been fakatay runi ma gaadho.
32. Beeni raad ma leh.
33. Beentaada hore runtaada danbay u xuntahay.
34. Beentaada hore, runtaada dambey dishaa.
35. Beentaada hore, runtaada danbey u daran tahay.
36. Beer wax dhalow ba'.
37. Beerka jecli, xaydha jecli.
38. Belaayo aanad guriga keensan banana kaama raacdo.
39. Belaayo guur bay ku tiraahdaa ama guurso.
40. Belaayo hor la qabtay leedahay ee dabo la qabto ma leh.
41. Belaayo kaa sii jeeda layskuma soo jeedsho.
42. Belo markay adiga kaa maqan tahay, qayrkaa bay ku maqan tahay.
43. Bidaari sibiq bay kugu gashaa.
44. Bilaysini Bir ka adag.
45. Bililiqo doon waa nabad diid.
46. Bil-saddex reerkaagana waa kaa kaxaysaa, reer kalena kuuma geysa.
47. Bir baa bir goysa.
48. Birta adag dab ayaa lagu jilciyaa.
49. Bisayl iyo ceedhiin waxa u dhexeeya waa yac-yacood.
50. Bisqin rag bay kuu gaysaa ragse kaama celiso.
51. Biya sar tegey waa la sugayaa.
52. Biyahaan fiirsi loo liqin, iyo hadalkaan fiirsi loo oran feerahay wax yeelaan.
53. Biyo ay horotood dhooqo tahay, dabadooda maxaad mooday.
54. Biyo gorore oo meel godan bay isugu tageen.
55. Biyo meel godan bay isugu tagaan.
56. Biyo sacabbadaadaa looga dhergaa.
57. Biyo socdaa biyo fadhiyey kiciyaan.
58. Boqol sano oo dawlad xumo ah, hal habeen oo dawlad la'aana baa xun.
59. Boraan hadimo ha qodin ku dhici doontaa mooyee.
60. Buubaal biyaha korkiisa saran buu ka didaa.
61. Buur caws ah oo biyo ku agyaal baadi doonyoo biciidkuba waa.
62. Buurta Saw iyo Sogsogley iyo Samow Boorame.

#### Maahmaahda Qaybta "C" ka Kacda

1. Caana daatay qabasho ma leh.
2. Caano baqay haddaad aragto, waa bi'iso naagood.
3. Caano Jiilaal canba canbid.
4. Caano yar iyo ciidan yarba marka la waayo ayaa la tebaa.
5. Caasigaa iridkaaga ma mooga, baarri dadow dad kuuma noqdo.
6. Cabaabiba cadaab bay ka subxaanalaysataa.
7. Cadawgaa looma taahee, tun ku adkay.
8. Cadho walaal waa la bariyaa (waa loo dulqaataa walaalkaa).
9. Cadku ceeji, xil iyo geeriba kuu dil.
10. Calafkaa, nin ku rabaa baa haya.
11. Caleen qudhac calool geel ma buuxiso.
12. Caleen qudhac calool geel waxba kama tarto.
13. Cali noolba wax sii.
14. Calool adayg waa illaahay wehelkii.
15. Calool rag waa webi xagaa.
16. Canaan ka yaab ceesaan ma doojo(waa lagu canaan dantaada looma seego).
17. Canaan ka yaab reer ma doojo.
18. Canbe laf baa ku jirta.
19. Canjeero siday u kala koreysaa loo cunaa.
20. Caqli gaaliyo indho quraanjo lama arko.
21. Caqli: Dugaag sankuu ka galay; Xoolo, sankuu ka galay; Rag, xabadkuu ka galay; Naago, indhuu ka gala
22. Car faruuroow foori gaalee?
23. Carab iyo ilkaa cid isugu dhaw iyana weeys qaniinaan.
24. Carab iyo labadiisa daan baa isugu dhaw iyana way is qaniinaan.
25. Carab loaad caws looma tilmaamo.
26. Caro walaal waa la bariyaa (subax baa lala sugaa).
27. Carraabo, fadhaa quusiyey.
28. Carrab dalab leh waa la gartaa, uur dadbanse lama garto.

29. Carruurey cayntaa ba 'day.
30. Carruuri kor cabsooday leedahaye, kal cabsooda ma leh.
31. Carruurta mulaca cayaar cayaar bay u dishaa, isagana waa u qur gooyo.
32. Caruur gaalana ma aha muslimna ma aha ee waa kii lagu daraa.
33. Caruuri waa ciil laga waynaado.
34. Casaan qurux kama qatana.
35. Casarkii wixii kugu dhacaa cishihii lagugu caayaa.
36. Ceeb looma dhinto, cara lalama qarxo, cayna looma dhaawacmo.
37. Ceebtaaday kow ogtahay, kun looma sheego.
38. Ceel biyo lihi ma foga.
39. Ceel dad liqa, ul baa lagu dayaa.
40. Ceesaan ninkii weyddiinteda kugu dhiba kaxaynteedaa lagu dhibaa.
41. Ceesaantii arigeeda diidda orgi shisheeyaa saarta (fuula, u baxa ama ka qabsada).
42. Cid wax kusiiisa wax badan baad aragtaa, cid kla talisase wax yar.
43. Cidlo ciirsi m leh.
44. Ciirtaa dhamaa, ceebtaada yaqaan.
45. Ciise socod kuma laabna, abeesona samir kuma laabna.
46. Cirmigaagoo dheeraadaa geel dhalayana waa ku tusaa.
47. Ciyaar baa dhab u gadoonta.
48. Ciyi waa ka beryey.
49. Ciyigii waa ka beryey qofkii cunay baa ka liita.
50. Ciyowga habeen dhawaaqay wax uu ka cawduu dareemay.
51. Col hortii baa hub la samaystaa.
52. Col iyo abaar cagahaagaa lagaga baxaa.
53. Col iyo nabad mid baa caynka lagu xejiyaa.
54. Col ku galay cabsi kugu reeb.
55. Col naago ka kacay iyo cadho norig ka keday midna ma sahal kuma qaboobo.
56. Colka wadhaf ma lagu dayey.
57. Colkaa ma dhamaadee ka kuu xigo ha u danbeeyo.
58. Cudud caano gaabsheen cagaar ma korsho.
59. Culimo dad u eki bay kugu dishaa, abeesona dhul u eki.
60. Cuntadaan gacantaada ku jirin iyo afkaagu way kala raagaan.

#### Maahmaahda Qaybta "D" ka Kacda

1. Daacadi ma hungowdo.
2. Daahdaahow hortiiis dafo waaye (Arrin degdeg u baahan lagama daaho sida heblaayo aad ogayd ooy hebel.
3. Daawo tiro wax kuma tarto.
4. Dab aan ku gubin kulaylkiisa ma ogid.
5. Dab ama hadal baa lagu bakhtiiyaa ama biyo.
6. Dab iyo xanuun meel ma wada fadhiistaan.
7. Dab munaafaq shiday baa duul dhan guba.
8. Dabaan kuleelkiisa la arag danbaskiisa lagama leexdo.
9. Dabada iiga qor anigaa durugsan doonee (Ma dhiirrado nin aan garab wax lagula dhisayni).
10. Dabagaale timir gaari waayey qaraara buu yiraahda'.
11. Dabalaay gooji ama ha goojin geela gu'ga dhalay uun baa lagugu tirin.
12. Dabeecad xuma dad kaa saartay.
13. Dabeecaddu diinta waa ka badh.
14. Dabkii baxayaa dab lagu qabsadaa.
15. Dacartuba mar bay malab dhashaa.
16. Dacas iyo dameeraba lama kala laha.
17. Dacas kaa wayni dhiiqaday kugu farjiyaan.
18. Dacawadii tallaabada nebiga ku dayatay, teediina ka tagtay tu kalena gaari weydey.
19. Dacawo duul-duul badan af libaaxeey dalaq dhahdaa.
20. Dad iyo weel godanba waa la badsadaa (weelka godan biyahaa ku urura).
21. Dad kaa badan iyo biyo kaa badanba way ku hanfiyaan.
22. Dad wax ugu liita ma tashe ma toshe ma tashiishe.
23. Dad wax yar tare ma ahee, wax ma tare ma leh.
24. Dad waxa ugu muran badan jaxar iyo jaahil.
25. Dad waxa yaqaan nin tuugsaday iyo nin u taliyey.
26. Dad waxaa yqaan nin tuugay iyo nin u taliyey.
27. Dadku hadalkay isku afgartaan xooluhuna urta.
28. Dadqal looma gurguurto.
29. Dagaal qofbaa ku dhintee qof kuma dhasho.
30. Dagaal wiil kuma dhashee, wiilbaa ku dhinta.
31. Dal aqoon la'aan waa la habaabaa, dad aqoon la'aana waa la qadaa.
32. Daleel marow maradiis geed ma daarow.
33. Dameer dhaan raac.
34. Dameer waa dameer sidii goodirkaba haw boodee.
35. Dameeraha Adari qofkii oodda ka qaadaa aroorsa.
36. Dameeraha Awdal ninkii ooda ka rogaa arroorsha.

37. Dameeraha ta ugu xun baa ugu haraati kulul.
38. Dameeraha ta ugu yar baa ugu biqlo badan.
39. Dameeri dhaan raacday.
40. Dameeri isku hallayn bay hooyadeed dabada uga nuugtaa.
41. Dameero awdalan ninkii ooda ka qaadaa arooriya.
42. Dameertu geel-didiska khuruf-khuruftay kaga dartay.
43. Dameertu inta aanay cida baran ayey dhuusada barataa.
44. Dameertu isku halayn bay hooyadeed dabada uga nuugtaa.
45. Dameertu ma hadhsato ilmaheedana ma hadhiso.
46. Dammeeraley Dad la xeer maaha.
47. Dan iyo xarrago is weyday.
48. Dan layskuma naco.
49. Dani waa seeto.
50. Dantaada derin karkaranna waa loogu seexdaa.
51. Dantaada iyo madaxaaga midna lagama boodo.
52. Dantaadana, maqaar eybaa loogu seexdaa.
53. Dantii mooge, maro duuga ka liitee.
54. Dantu ceebba ma lahee dadkuun baysku nacaya.
55. Darandoorriyaaba naas-naasi (Nin ordaaba istaag.)
56. Dardaaran caweysin kallah arooryaad buu leeyahay. (Arrin la qorsheeyey meel laga bilaaboayey leedahay.)
57. Dardaaran waa inta xayga la yahay.
58. Dawaco geel ma cunto.
59. Dawaco meeshay macal idood ku baratay, macaluul ugu bakhtidaa.
60. Dawarsato dariiqay ku collowdaa.
61. Deero waa dal maddays.
62. Deriskaa dagaalkaaga rabaa, dooradaada cessaas ku dhahaa.
63. Deriskaaskaa marna ku dayo marna ku diin.
64. Dhabada yari dhabada wayn bay kugu ridaa.
65. Dhac dushii laguma wada hadlo.
66. Dhadhan shaa waalan dhergaana ka sii daran.
67. Dhagar qabe dhulkaa u dhaq-dhaqaaqa.
68. Dhagax meel dhow buu ku dhacaa, hadalna meel dheer.
69. Dhagax tuujin iyo taabasho waa isugu mid.
70. Dhalaan dheelaa baradi, dhusuntaa far koo galiyee?
71. Dhalaan dheelaa baradi, dhusuntaa far koo galiyee = Dhalaan (caruur, ilmo, ubad) ciyaarta bartay dabadoo
72. Dhalaan qayladu waa qaboonada.
73. Dhaliili dhaban bay ku taal.
74. Dhalinyaro dhubuq dhubuq hore dhabana hays danbay leedahay.
75. Dhallaan dhargay fartaa loo lulaa (way iska qoslayaan).
76. Dhallaan qayladii waa qaboonada.
77. Dhar kaa dheer dhaxan kaama reebo.
78. Dhaxal gorayo dhabad baa leh.
79. Dhaxal goroyo dhebed baa iska leh.
80. Dhedo roob noqon weydey.
81. Dheere iyo gabane un baa jiree, Dhuubane majiro.
82. Dheerow ii gaabow yaa jaree, dhuubow ma jaro.
83. Dheg haddii la jaro daloolkaa hara.
84. Dheg wax xun maqlaysaa wax wacan ma weriso.
85. Dhegta hadii la gooyo daloolkaa hadha.
86. Dheriga karkaa maxaa ka keenay, kulayl weeye.
87. Dhib lagula qabo dhib ma eh.
88. Dhicisku inta mindida loo soo siduu bakhtiyaa.
89. Dhidar xabaalo qod bartay qudhin buu uga dhacaa.
90. Dhiig islaan ma qarsoomo.
91. Dhiil maran iyo dhiil buuxa la iskuma dhufto (Wax aan isu qalmi la isma dhaafsado).
92. Dhilaa la waaniyey markaasay tidhi ii dhakhsada rag bay sugayee.
93. Dhilllo, intaadan dhillo oran bay dhillo ku tiraahdaa.
94. Dhilo garcatay mar horey ku nabad gashay.
95. Dhoofaa kaa dhimay! (bal tan ka warran, ma run baa?)
96. Dhoofaa kaa dhimay.
97. Dhool bari ka soo kacaa dhaan loo nageeyaa.
98. Dhubuq-dhubuq hore dhabanahays dambey leedahay.
99. Dhur waa la tegis bartay ka ridistu waa ku ceeb.
100. Dhurwaa dhoomo laguma rarto.
101. Dhurwaabaa lagu yidhi fool xumadaa, markaasuu yidhi walaalkay weerana ma aragteen.
102. Dhuumashada dhabarku muqdo dhuumasho ma aha.
103. Dib u gurasho dib bay kuu dhigtaa.
104. Dibi hooyo xumi hore uma koro.
105. Dibi hooyo xumi korme ma noqdo.
106. Dibi hooyo xumi, hore ma noqdo.
107. Dibi, bay waw dhutiya.
108. Diidiink weelshee deymoodaa ka koriyee ma danbar manuujiyaaw = Diinku ubadkiisa eegmaduu ku

koriyaa.

109. Dix dhaaxood dhagax ka waa, hayeesa hangool ka waa.
110. Dixrigu(duqsigu) dantiisuu qudhunka ugu jiraa.
111. Doc ka yeedh iyo dameerkaba daankaa la jebiyaa.
112. Doofaarka ficil la'aan baa loo cadaabaa.
113. Dooro hadey hal waddo iyo hadey toban waddo Kurug, Kurug ma Dhaafeeyso...
114. Dooro hadey hal waddo iyo hadey toban waddo kurug, kurug ma dhaafeeyso.
115. Dooro qoor qabasho biyo kuma cabto.
116. Dooro xaarka way wada cuntaa, af-tirashadeyse isku dhaantaa.
117. Doqon alle bariday xeradeeday ka aragtay.
118. Doqon dib bay wax ka garataa.
119. Doqon ha u gargaarin hana gargaarsan.
120. Doqon iyo habeen baa madaw.
121. Doqon milantay iyo geesi damac bartay dhexdoodaa miidaamo ka hacdaa.
122. Doqon nebi Muusaa habaaray.
123. Doqon qaddar alla taqaanna qulucdaada looma dhiibto.
124. Doqon sokeeye maaha.
125. Doqoneey dabkaa ba.
126. Doqoni amaanay lahayn bay u rixisaa.
127. Doqoni cad ciid loogu riday cay bay mooddaa.
128. Doqoni calaf ma leh.
129. Doqoni haddii nla xifaaltamo in la is diriray bay mooddaa.
130. Doqoni hoosiis bay had mooddaa.
131. Doqoni meeshii la isku diriray uun bay ogeyd, meeshii lagu heshiye sema oga.
132. Doqoni qiiq kama kacdee daamankay meer meerisaa.
133. Doqoni saaf carro loogu riday, sad bursiinyo ma mooddo.
134. Doqoni sokeeye ma aha.
135. Doqoni waxay leedahay laba iyo toban indhood, hal mid waxay ku aragtaa.
136. Doqoni xarigga lagu xiri xusulladay ku sidataa.
137. Doqoni xin mooyiye, xisaab ma oga.
138. Doqoniino waa shil.
139. Doqonkii lumay oo la soo helay wuxuu yiri; "Maxaa la iiga farxi berriba waan lumiye.
140. Doqonta usha agteedaa lagu dhufaa haday garan waydana goshaa oo geshaa.
141. Doqontu afka xanbay ku sidaa ishana xil.
142. Doqontu hadalkay dib u gocotaa.
143. Doqontu marka la ficil tamayo in laka tagayo ayey mooddaa.
144. Doqontu xeerna ma hoyso, xoolana ma hoyso.
145. Dudumo dheeraataa dhulkuun bay ku noqotaa.
146. Dudun dareen ii dugsasho inis ki dartooy = Dudun dareen iyo dugsasho,ha iskugudarin.
147. Dudun dareen ii dugsashu inis ki dartooy.
148. Dukhsi biyo ku dabaal bartay fuud buu ku bakhtiyaa.
149. Dukhsi dantiisuu dumurka (qudhunka) ugu jiraa.
150. Dukhsi dantiisuu dumurka ugu jiraa.
151. Dukulush timir deeri waayi Kharaaraa tuf in erre?
152. Dul qaadasho yey noqon tii dibiga.
153. Dumaal ni ka xishooday kama ilmo dhalo.
154. Dumar iyo dheri toona yar yaraysi malaha.
155. Dumar yaryaraysi male.
156. Dumarka been baa lagu soo xero geliyaa runa waa lagu dhaqaa.
157. Duqsi, caanuu ku dabaal bartaa fuudbuuse ku gubtaa.
158. Durduro geel baa ku jaba.
159. Durduro waxarood xanan(qodax) bay kula gashaa.

Maahmaahda Qaybta "E" ka Kacda

1. Erray nimaan dhaafin odday ma dhalin.
2. Ey is cunaysaa waraabe iskama celiso.
3. Eydin geel kolba waa ninkii ku danbeeya.
4. Eygii oo laf diiday ma noola.

Maahmaahda Qaybta "F" ka Kacda

1. Faan badan iyo faq badaniba ma wacna.
2. Faanoole fari kama qodna.
3. Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa.
4. Falaadhi gilgilasho kaagama godo.
5. Fallaartii cirka loo ganay cid kastoy filo.
6. Far bugtaa, Faro ka dheer.
7. Far iyo meel bugtaa is og.
8. Far kaliyihii waji ma maydho.

9. Far keliya Fool ma dhaqdo.
10. Faras aanad lahayn fuul madiisa futaqaradh baa laga qaadaa.
11. Fardaha dheereeyaa Fagaarahay isku arkaan.
12. Fardo laysu hayo maxaa laysugu faan.
13. Farihii dufan leh ayaa wax duuga.
14. Faro ka ciyaar dabo ka ciyaar baa dhaanta.
15. Farsamo xumo, futada cankeeday ku goysaa.
16. Faruuroow maxaa berbera ku geeeyey? Dee faduul!
17. Fulay hooyadii ma goblanto.
18. Fulay wax ka wadne weyn.
19. Fulay wax ka qoryo badan.
20. Fullaw guuli kuu dhawaydaa.
21. Futo iyo dhul isma huraan.

#### Maahmaahda Qaybta "G" ka Kacda

1. Gaal dil gartiisana sii.
2. Gaashaan qaad ma anbado.
3. Gabadh nin dhali karaa dhiqi kara.
4. Gabadha dheg-dameer in leeg baa ku dansanta wiilkana in til leeg baa ku darsanta.
5. Gabadhi waa meel xun joog.
6. Gacani waa miskiin.
7. Gacantaadu hadday dhudhub gasho, lagama dhuftee waa laga dhirindhiriyaa.
8. Gacantii oodan goyn karin, waa la shumiyaa?
9. Gacmo wada jirbay wax ku goyn karaan.
10. Gadal gadaal geed looma koro.
11. Gadhba gadhbaa la tusaa.
12. Gar dabadeed, guu-guu (gunuunuc) baan nacay.
13. Gar waa loo wada islaam.
14. Gardarraa ma guulaysto.
15. Gardarro looma garbo yeelo.
16. Gari ilaahay bay taqaan.
17. Gari laba nin kama wada qosliso.
18. Gaws iyo gustoona layskuma ag dhaqdhaqaaajiyo.
19. Geed joog gartii waa yaqaan, laga dhimayna dhaxalkii waa yaqaan.
20. Geed walba in gubtaa, waa hoos taal.
21. Geel carruuri qaaday ma foga.
22. Geel caruuri qaaday ma foga.
23. Geel darreeray nin ka dayrshay ma awliya allaa.
24. Geel indho kuul muxuu ka kasaa?
25. Geel laba jir soo wada mar.
26. Geel soddon qaday, saddex kuma dari waayo.
27. Geeli waa geel, wixii gooyaana waa geel.
28. Geel-jire isagooy ushu u goantahay ayuu xaggeen ka goostaa ku yidhaa.
29. Geeljire, geela waa wada jirtaa, waana kala jirtaa.
30. Geelow geed walba daaqdaye, markaad ciin daaqdaa lagu yaabaa.
31. Geeri nimaan aqoon iyo geel jiray ku wanaagsantahay.
32. Geeriyu nin aadan aqoonin iyo geeljiray ku roomntahay.
33. Gees loaad kulayl kaa lagu jaraa.
34. Gees lo'aad kulaylkaa lagu gooyaa.
35. Geesi allaahay ma xilo.
36. Geesi, alle ma xidho.
37. Gobanimo waa joome.
38. God hadimo ha qodin, haddaad qoddana ha dheerayn, ku dhici doontaana ma ogid.
39. God mar ku asturay xumaantiisa lama sheeg sheego.
40. Gorayo la hub sayoo haad bay noqotay.
41. Gorgor, haadda ka weyn.
42. Gorgortan saaxiib iyo walaal toona ma yaqaan.
43. Gudineey ima goyseen, haddaan badhkay kugu jirin.
44. Gudini geed ma goyseen, haddaan geed kale ku goyn.
45. Gumur uraasa, weyne gurudee (gumur wey urtaa waana lagurtaa).
46. Gurbaan garabkaaga ha kuugu jiro ama gacalkaa hakuu hayo.
47. Guur marka hore waa sino dhuuban yahay, marka dambena waa sino ballaaran ahay.
48. Guursato loo galmoon og.

#### Maahmaahda Qaybta "H" ka Kacda

1. Haad habeen kacay waxbaa kiciyey.
2. Haani guntay ka tolantaa.
3. Habaar waalid ma hadho.

4. Habar baas inan baas bay ahayd.
5. Habar caal weydey durey bay hafartaa.
6. Habar dhali wayday aleelo ku waalatay.
7. Habar fadhida legdini wax uga fudud.
8. Habar Jeclo, hadalka dib bay u gocotaa.
9. Habar roob hayo, ta kalena inuu hayey modaa.
10. Habeen ciidan maaha.
11. Habeenkii hoos baa loo hadlaa maalintiina hareera haa layska eegaa.
12. Hadal aan fiiro loo odhani wuu kula fogaadaa, caano aan fiiqsi loo dhamina feedhahay wax yeelaan.
13. Hadal badani haan ma buuxsho.
14. Hadal hadal kama dheera.
15. Hadal intaadan buu ammaan yahay.
16. Hadal iyo hablaba duco la'aan bay tarmaan.
17. Hadal iyo hilibaba kala qalan.
18. Hadal lama wadaagee caanaa la wadaagaa.
19. Hadal nin badiyeyna ma dhamayn nin yareeyeyna waxba kama tegin.
20. Hadal nin badiyeyna ma wada odhan, nin yarreeyeyna kama wad tegin.
21. Hadal nin si u yiri, ninna si u qaaday.
22. Hadal tuurtuur kuma sama.
23. Hadal waa dheh iyo dhagayso.
24. Hadal waa la kala odhan og yahay illaahayna waa la kala bariyi og yahay.
25. Hadal waa margi.
26. Hadal waa mergi hadba meel u jiidma.
27. Hadal waayeel waa guudmar. / Hadal yar iyo hawl badan.
28. Hadalaw nin si kuu yidhi hawraarayna ninba si kuu qaaday.
29. Hadalka kiisa kulul iyo kiisa qaboobi meel buu isugu tagaa.
30. Hadalka wanaagsani waa sadaqo.
31. Hadalku intuu uurkaaga ku jiro ayuu amaanadaa yahay.
32. Hadalku intuu uurkaaga ku jiro ayuu ammaano yahay.
33. Hadalna sii dhehbaa diley hanbana sii hudhbaa dishay.
34. Haday fooli timaado gudo qarsiimo reeban.
35. Hadba sidii loo jabaa loo dhitiyaa.
36. Haddaad been sheegayso been run u eeg sheeg.
37. Haddaad hungurooto waa la hadlaa oo habaa la dhisaa wax laug helo.
38. Haddaad tagto meel lagu il laayahay ishaa layska ridaa.
39. Haddaan sacabka xeeli ku jiran, maxaa habeenkii loo tumaa.
40. Hadday curaddii durdurisay aaran maxaad moodday.
41. Hadday degdegsiyo door dhalaan, kaadsiyana kiish lacageey dhalaan.
42. Hadday tubaako, faa'iido leedahay Habargidir baa liqi lahayd.
43. Haddii aan la kala roonaan roob ma dao.
44. Haddii uu deg degsiinyo door dhalo raagsiin yuhuna kiish lacaguu dhalaa.
45. Haddii lagu sheego waa lays sheelaa, haddii lagu sheelana waa lays sheegaa.
46. Haddii aad dhimanayso dhareerkaa layska duwaa.
47. Hal diidaysaa geed ay ku xoqato ma weydo.
48. Hal libaax arkaysaa ma godlato.
49. Hal libaax arkaysaa ma godlato.
50. Hal maqaarka diidaysaa daldalool bay ka eegtaa.
51. Haliba wiilkay korisaa, wedkeeda leh.
52. Halmaan hadal kuma jiro.
53. Hamba soor ma eh.
54. Hangaraarac lug uma dhutiyo.
55. Harag sagaaro iiga kac ma ahee iiga durug ma leh.
56. Hasha naasa adag iyo weedha (hadalka) maxaa kulmiyey.
57. Hashu ragaadka, maysku eryeysaa, mise wayska bixinaysaa.
58. Hawli jid caddeysay.
59. Hawo iyo hoos galbeed labadaba lama gaadho.
60. Heeraa wan ma eh?
61. Heesta geelu waa kala horreysaa.
62. Hilib beer laga dooray waa weyd.
63. Hilib hal dukhsi ayaa qudhmiya.
64. Hillaac biyihisuu muujiyaa.
65. Hoonbaro libaax bay soo wadaa.
66. Hooyadii ka guure habar yartii kuma negaado.
67. Hubkaaga iyo hayinkaaga, midna laguma hodmo.
68. Hubsiiimo hal baa la siistaa.
69. Hunguri wax ka weyn la mariyaa wuu dillaacaa.
70. Hunguri weyni kuunto weyni baa laga qaadaa.
71. Hunnu hunnu hadal maaha, himbiriirsi arag ma aha.
72. Hurdo cagahay ka bilaabataa.
73. Hurdo habar ma koriso.

#### Maahmaahda Qaybta "I" ka Kacda

1. Ibtilaysan ayaa belaayo tilmaanta.
2. Il ibtilaysan ayaa balaayo tilmaanta.
3. Illeyn doqoni qiiq kama kacdee daamankey meer meerisaa.
4. In habari gasho, hali ma qaado.
5. Inantay hooyadeed hadhuudhka tuntaa iyana haadintay barataa.
6. Inantii hooyadeed hadhuudhka tuntaa, iyana hufkiyo haadiskay barataa.
7. Indho is jecel isma eegi karaan.
8. Inneen daaman nool ma daalaan, oo dad baan nahay kaama daayaan.
9. Inta aanad falin ka fiirso.
10. Inta gaari la doon-doonayo, ayaa goombaar wiilkeedu ciidamiyaa.
11. Inta jiillaal loo adkaysto, jir looma adkeysto.
12. Intaadan falin ka fiirso.
13. Intii orod jirey, kuftinna way jirtey.
14. Irrid af ma daboole ee ood baa daboosha.
15. Ishaadaa kuu macalin ah.
16. Ishaadu waa kula da' dhegtaaduna way kaa da'wayn tahay.
17. Ishaaduna waa kula fil, dhegtaaduna way kaa weyntahay.
18. Ishiisa laga gartaa, ushiisa lagu tumaa.
19. Isla weyn, dooro weyn.
20. Isma hubsato aroorkeeda ka mashxaradaa la yidhaahdaa.
21. Isma'og aqalkiibay aslaysaa.
22. Isu qabe aan loo qabin.

#### Maahmaahda Qaybta "J" ka Kacda

1. Jacayl biri ma gawso.
2. Jacayl Biri ma goyso Biyana kaama maydhaan.
3. Jidh qalaad waa dhul qalaad.
4. Jiid aan ku jiidee waa gacmo daalis.
5. Jinni, Ninkii keenaa bixiya.

#### Maahmaahda Qaybta "K" ka Kacda

1. Kaadi badane waa loo gogol badiyaa.
2. Kab xume ma hadhee kab laawaa hadha.
3. Kaftan iyo kaadi baa laysku cadaaba.
4. Karis xun iyana ku wax la'.
5. Kelyo nimaan lahayn bay kaadiyi dishaa.
6. Kibir waa lagu kufaa.
7. Kibir wuxu kaa saaraa hadhka meelse kuma geeyo.
8. Kibiraw kab iga xoor faanawna far iga jabi.
9. Kitaab gurigiisii loo diiday, sayax Illaah baa baday.
10. Kitaab meelaan lagu fasirayn laguma furfuro.
11. Kolka waylaha la helo ayaa loodana la maalaa.
12. Kuftin jillib iyo habaar waalid midina sahal kuma hadho.

#### Maahmaahda Qaybta "L" ka Kacda

1. La jiifiyaana bannaan, la joojiyaana bannaan.
2. Laabtu low ma aha hadba la laalaabi karo.
3. Laba layskuma daro: bidaar iyo timo, baryo iyo ad-adayg.
4. Laba qaawan isma qaaddo.
5. Laba tallaabo dhexdood baa talo ka dhalataa. Laba u la.
6. Labaatan jir intuu geed ka booduu talo ka boodaa.
7. Labadii qaydhin ku qaybsatay bisayl iskuma cawrido.
8. Labadii xaqdaro ku heshiisa xaqay ku diriraan.
9. Labo bukta ma is baaniyaan.
10. Labo qaawani isma qaado.
11. Lacagina lacag bay dhashaa injirina qindhicil.
12. Laf jabtay sideedii ma noqoto.
13. Lafo geel iyagaa laysku jebshaa.
14. Lama gano falaadh kugu soo noqon doonta.
15. Lama huraan waa caws jiilaal.
16. Lax gawracan maqaarsiib kuma xanuunsato.
17. Laxi shilalkay is dhigtaa lagu qalaa.
18. Layligu kasha biyihisa ku jiruu ka didaa.



19. Libaax aan dhiig dhadhaminini habeen ma ciyo.
20. Libaax deeqi ka gurxamisay.
21. Libaax intay bulbushu ku taal, bahal ma cuno.
22. Libaax lab god lagama kiciyo.
23. Libaax nin aan aqoon baa lax ka rida.
24. Libaax nin ganay iyo nin galadayba og.
25. Lixdan jir laguma helo qiimigaad laba jirkaa wayday.
26. Loogow lagu minan fadhiyee.
27. Lugtii jeeniga dhaaftaa way jabtaa.
28. Luqun dheeraatay madax ma dhaafto.
29. Luuq luuq maraw laasim laamiguu iman.

#### Maahmaahda Qaybta "M" ka Kacda

1. Ma ciil sokeeyaa ku haya, mise ciddi hoosteedaa lagaa hayaa.
2. Ma maahmaahde waa loo maahmaahaa.
3. Ma nimaan wax aqoon baad wax la qaybsataa, mise baddaasaad dhurtaa.
4. Ma taagtaa baad guurtaa, mise taako-taako.
5. Ma waxaad yeeshaa, wax naftaada u fiican oo wiilkaaga u xun, mise wax naftaada u xun oo wiilkaaga u fiican.
6. Maal yar iimaankaa lagu qabaa.
7. Maalinkii intay ishaada gaadhaa la hadlaa, habeenkiina inta gacantaada gaadho.
8. Marna taagtaa marna tamartaa.
9. Madax meel ka sarraysa oo la taabtaa ma jirto.
10. Madax muuqda iyo mindi saawira midna lagama samro.
11. Madheysi ii Moora gaabey lan maal qaboo dagee?
12. Majeerteenku wuxuu naagaha ugu tagaa naag danbe arki maysid,
13. Mallay intaas dufin aa la kariyaa.
14. Mallay maanyo ku jiro dheri looma saarto.
15. Manjo dhooqo leh, kuwo dhaqanaa ka roon.
16. Manjo dhooqo leh, marba mid baa la siibaa.
17. Mar i dage alla ha dago, mar labaadse anays dagay.
18. Marba sidaad u jabtaa loo dhutiya.
19. Mareexaan ma ahee waa ma riixmaan.
20. Marna taagtaa marna tamartaa.
21. Maroodi takarta saaran ma arkee, ta kaluu arkaa. / Maroodigu takarta ku taagan ma arkee ta ka kale ku taagan buu arkaa.
22. Martidu marka hore reerkaa ka naxa marka dambena iyadaa kala naxda.
23. Masayr waddo ma leh.
24. Matag meeshaad doonayso kuguma simo.
25. Maxay ka nuugtaa ama ku nuugtaa, bushmo iyo naaso midna maleh.
26. Mayd kee baa ugu danbeeyey?kaa la sii sido.
27. Meel aar ka kacay atoor fadhfadhiisay.
28. Meel caws lihi abaar maaha.
29. Meel hoo doonaysa hadal wax kama taro.
30. Meel hoo u baahan hadal wax kama taro
31. Meelaad ku dhashay, waa meelaad ku dhimatay.
32. Meelaad madaxeeda tahay, manjo lama noqdo.
33. Meeshaad ku qubaysataa lagu qalalsadaa.
34. Meeshii cir laga filayey ceeryaamo ka timi.
35. Midgaantu intay gude kale fadhayso ayaa keedu qudhmaa.
36. Midho berde duuduub baa lagu liqaa.
37. Midho geed saaran, kuwo guntiga ku jira looma qubo.
38. Midho guntiga kuugu jira looma daadsho midho geed saran.
39. Midho kaa fog baa qadhaadh lagu tilmaamaa.
40. Midiidin la'aan waa la midgoobaa.
41. Milil hoostii lama dhayo, haddii la dhayana qudhun baa looga dhacaa.
42. Mindi aad u af badan gacantii lahayd bay goysaa.
43. Mindidii qooqdaa dib bay u qaddaa.
44. Mindidu haddii aan meel la dhigin ma mirirto.
45. Mira daray duuduubkaa lagu liqaa.
46. Miro guntiga ku jira miro geed saaran looma daadsho..
47. Misbax minankaga u mugdi ah, minan dadow ma loogu nureyo?
48. Mrkhaatina marag baa la dhigtaa masaajidna dhagax.
49. Mugdi, arlaada geed ii goduh?
50. Mukulaal minankeeda joogtaa miciyo libaax bay leedahay.
51. Mukulaal minankeedii joogtaa miciya aar bay leedahay.
52. Mukulaashu dooliga danteeday u dabataa.
53. Mulac caruuri qabatay isna waa ku qudhgooyo iyana waa ku ciyaayir ciyaayir.
54. Mulac, dilistiis isaga waw qudh gooyo, carruurtana waw cayaayir.
55. Muruqa laba suulle ninba si ku ah.

Maahmaahda Qaybta "N" ka Kacda

1. Naag kun baa koodisa, kow baana guursada.
2. Naag, naag ka umulisay iyo nin reer u weyni, midna siday wax u ogyihiin uma sheegaan.
3. Naagaha iyo carruurtaba sasabaa lagu wadaa.
4. Naagi kun nin way la sheekaysataa kawna way ka guursataa.
5. Naagi naag lala qabo waa u col.
6. Naagi nimay legdaan, kama kacaan.
7. Naagi ninkay legedo kama kacdo.
8. Naago abaal ha u gelin amaahse ha u diidin.
9. Naago badhaadhahooday ka sheekeeyaan, ragna ba'ooda.
10. Naago been baa lagu soo xero geliyaa runna waa lagu dhaqaa.
11. Naago iyo riyaba diifta ayey isku eryoodaan.
12. Naago jileec iyo naxariis midna wax kuma laha.
13. Naago nimaan maddaxooda maja u rogin nin ma moodaan.
14. Naago nin ay yaqaaniin col ma moodaan.
15. Naago waa belo loo baahan yahay.
16. Naago waa u samir ama ka simir.
17. Naago wax laga bixiyey laguma dhaqo oo wax loo hayaa lagu dhaqaa.
18. Naago yaryarasi ma le.
19. Naagtii caana xun dhigataa iyana ku murud la'.
20. Naaguhu hoosiis bay hadh moodaan.
21. Naar hooba galaaso bartaa ey la aragneey, tiimbooy. (Naar si fiican baa loo galaa, hadii kale banaankaa laga joogaa.)
22. Naaso kor u jeeda nin arkaa, kuwo hoos u jeeda ma arko.
23. Nabad la'aani waa nolol la'aan.
24. Naf wax jecel allaa dhibay.
25. Nafeey, nin ku doona ku waa.
26. Nafsi raaga rag iyo geel baa iska leh.
27. Nafsigu ma hadho.
28. Naftu orod bay kugu aamintaa.
29. Naftu waxay ogtahay ilaashataa.
30. Naxariis eebbe lagama quusto.
31. Nimaad dhashay kuma dhalin.
32. Nimaad fadhiga kaga adag tahay looma saro kaco.
33. Nimaad kabahiisa tolayso, kafantaada tolaaya.
34. Nimaad kabo ka tolanayso kabihisaa la eegaa.
35. Nimaan balan lahayni waa nin aan diin lahayn.
36. Nimaan dhididin ma dhargo.
37. Nimaan dhul marin dhaayo malaha.
38. Nimaan hadlin habartiina wax ma siiso.
39. Nimaan habsiimo lahayni war gal maaha.
40. Nimaan kuu furu doonin yuusan kuu rarin.
41. Nimaan naxariisan looma naxariisto.
42. Nimaan qaybin jirin haduu qaybiyo nimaan qadi jirin baa qada.
43. Nimaan qooq dilin maroodi ma dilo.
44. Nimaan shantaasi kaa dabaalin sharci kaama dabaalo.
45. Nimaan shaqaysan shaah waa ka xaaraan.
46. Nimaan shaqaysan shaxaad baa dila.
47. Nimaan waxa jooga garanin waxa soo socdana ma garto.
48. Nimay meeli buktaa isagay balbasha.
49. Nin aad kabtiisa tolaysaa, kadabkaaga jaraya.
50. Nin aan baqani ma bad baado.
51. Nin aan dhididin ma dhargo.
52. nin aan dulqaadasho lahayni waa geel aan horwayn lahayn.
53. Nin aan hadlin habartiisba qadisay.
54. Nin aan kuu furayni yuu kuu rarin.
55. Nin aan maahmaahin cod kar maaha.
56. Nin aan wax garad ahayn haanta gadaankeedaa wax loo saaraa nin wax garad ahna daaqsin geel.
57. Nin aanad maalin ku baranin sanad kuma baratid.
58. Nin abaal gala wax badan baa la arkaa ninke guda wax yar baa la arkaa.
59. Nin ani yidhi dad iska saar.
60. Nin buka boqol u tali.
61. Nin casarkii isa sheegay, cishihii ceebi ma qabato.
62. Nin daad qaaday xunbo cuskey.
63. Nin dameero dabadood ka degay meel uga toban buu waayey.
64. Nin dameero rartaa dad la toy ma aha.
65. Nin dhintay kabihisaa dhaama.
66. Nin durbaan tumay ilaaq dalbay.
67. Nin durbaan tuntay ilaaq dalbay.
68. Nin duulay dantii kaa og.

69. Nin faash wataa xaabo ma waayo.
70. Nin fadhiya, looma saro joogsado.
71. Nin faruurani ma fooryo.
72. Nin gu kaa wayn garaad kaa wayn.
73. Nin hadduu isukaa waalo waa laysla waalaa.
74. Nin ilko waa wayn haduu dhintona inuu qoslayaa la moodaa.
75. Nin Illaahay ka dambeeya kabtii ma yeela.
76. Nin is faanshay waa ri is nuugtay.
77. Nin iyo naag is qaba colna ma aha nabadna ma aha.
78. Nin iyo qabkiis.
79. Nin jiifa lama legdo.
80. Nin kaa wayna waxba looma sheego.nin dheerna waxba looma tilmaamo.
81. Nin kaligii tashaday waa nin orgi rartay.
82. Nin keligii garramay, iyo nin dhul gannay midna ma gefo.
83. Nin ku arkaaya looma saro kaco.
84. Nin ku necebi xantaa og, nin ku jeclina xogtaa og.
85. Nin kuu digay kuma dilin.
86. Nin la dhacay ama caytan ama habaartan.
87. Nin la sugayoow adna yaad sugin.
88. Nin lagu seexdaw ha seexan.
89. Nin maalin ma gaadhid, nina sanad ma gaadhid, nina weligaaba ma gaadhid. Nin maalin ma gaadhid oo waa ninka kaa faraska dheereeya. Nin sanad ma gaadhid oo waa ninka xoolihiisu sanadkaa meel caws badan daaqiyey. Nin weligaa ma gaadhid oo waa ninka kaa gabadha/naagta wanaagsan.
90. Nin magaalo ka dudaw siigo yare.
91. Nin mar waashay waalida loogama sheekeeyo.
92. Nin nin kaaa xigo iyo hawl nin kaa xigo midna laguma deg dego.
93. Nin ood sida iyo nin adhi la joogaa arin ma kala laastaan.
94. Nin ooman biyaha hoo baa deeqa.
95. Nin qoyani, biyo iskama dhowro.
96. Nin qurux badan naagtaada uga yaab nin fool xuna naftaada uga yaab.
97. Nin rag ah looma duur xulo.
98. Nin reer ugu wayn iyo naag naag ka umulisay midna siday wax u arkaan uma sheegaan.
99. Nin sigtay ma nabad gelin.
100. Nin soo fadhiiso laga waayo soo seexaa laga helaa.
101. Nin soori kaa qaaday waa nin seefi kaa qaaday.
102. Nin tuur lihi sida uu u seexdo isagaa kaa yaqaan.
103. Nin waalan tolkii baa u miyir qaba.
104. Nin walba intay taagtii tahay baa qoraxdu ugu tagtaa.
105. Nin walba meeshii buktaa belbesha.
106. Nin waliba waxa uu yahay ayuu ku moodaa.
107. Nin war kuu keenay war kaa qaad.
108. Nin wax dhaqay dhurwaana wax u dhaq.
109. Nin wax yaqaan daaqsin geel baa wax loo mariyaa, ninaan wax aqoonna qaanso qurqurkeed.
110. Nin wayn tag lama yidhaahdee wuxuu ku tagaa la tusaa.
111. Nin wayni waa qorax casar joogta.
112. Nin wayni wadkiisa waa yaqaan.
113. Nin yari waa nin ban soo ordaya.
114. Nina dabeecadiisa lama doorin karo.
115. Ninaan hadlin, hooyadiis qadisay.
116. Ninba curadkiisa ceel gee.
117. Ninba gurigii gaado ku leh.
118. Ninba kaskiisuu kor tagaa.
119. Ninka aan hadalka suginin warrankana ma sugo.
120. Ninka aragiisu ku deeqo ayaa oontiisuna ku deeqdaa.
121. Ninkaad adhi weydiisanayso, geel weydii.
122. Ninkii belaayadaada raba, bawdkaagu qori ka jabsadaa.
123. Ninkii dhagar qaba dhulkaa u dhaqdhaqaaqa.
124. Ninkii dhimanayaa dheg baa dheer.
125. Ninkii geed fuulay asigi lee kasoo degi.
126. Ninkii seexdaa sixii dibi dhalay.
127. Ninkii talin jiray hadduu tago, midaan talin jirin baa yimaada.
128. Ninkii tiisa daryeelaa tu kale ku dara.
129. Ninkii uurka dabana Illaah baa arka, ninkii isha dabana Aadmibaa arka.
130. Ninna caadidii ma daayo, bahalna ceedhin ma daayo.
131. Nin meeli u cadahay meeli ka madaw.
132. Nin caadadii ka maydh iyo dundumo ciid ka maydh labadaba waa lagu daalaa.

Maahmaahda Qaybta "O" ka Kacda

1. Ood is qabsatay maroodina way qarisaa.
2. Ood kaa dheeri kuma dhaxan tirto.

3. Ood qaadis iyo jiidis waa isla guri geyn.
4. Oodi siday u kala sarreeysaa loo kala guraa.
5. Oodo dhacmeed siday u kala sareeyaan baa loo kala guraa.

#### Maahmaahda Qaybta "Q" ka Kacda

1. Qaadis iyo jiidis waa isla guryo geyn.
2. Qalbigu laba ruux ma wada qaado.
3. Qawl nin wayn ka dhacay waa qolof geed ka dhacday.
4. Qaybshe qad ama qaaday.
5. Qof aan waxa soo socda garan waxa joogana ma garto.
6. Qof caashaq hayaa wax ka calaancal badan.
7. Qof nool oo ku hortaagan lagama quusto.
8. Qof walba qumanihisaa qoorta ugu jira.
9. Qof waliba wuxuu dhigtuu dheeftaa.
10. Qof waliba intuu cunuu ciidamiyaa.
11. Qofkii aragiisu ku deeqaa oontiisuna ku deeqdaa.
12. Qoryo adistooda isku duwis baa horreysa.
13. Qosol badani qoonsimaad noqoy.
14. Qosol hiil leh.
15. Qosol qoonsimaad noqay.
16. Qufac iyo uur midna ma qarsoomo.
17. Qunyar socde qodaxi ma mudo.
18. Quruxi waa ishaada, qiimana waa ayaankaaga.
19. Quud aan jirin qoryo u guro.

#### Maahmaahda Qaybta "R" ka Kacda

1. Ra saddex ka oggow: Gacan gudhan, gar weecsan, iyo guddoon jilicsan.
2. Raad arrooryo dib looma raaco.
3. Rag gar baa kala saarta dumarna jaan.
4. Rag hunguri buu isku raacaa.
5. Rag jidiin baa walaaleeya.
6. Rag la'aan waxba kuma yeeshee Rag xumaa ku disha.
7. Rag qawl baa xidha dumarna meher.
8. Rag sadex lama raaco, ma fakere, ma faaidayste, ma foorarsade.
9. Rag waa arin keen iyo aqbalkeen.
10. Rag waa raggii hore hadalna waa intuu yidhi.
11. Rag waa shaah dumarna waa sheeko.
12. Rag walaalow wuxuu ku dhaamo la waa.
13. Rag waxa ugu faan badan mar dhoof iyo mar duul.
14. Rag waxa ugu liita ciil kama baxe iyo calooshiisa la ciyaare.
15. Rag waxa ugu liita looma maahmaahde, looma sheekeeye, looma soo gale.
16. Rag waxa ugu liita, ma hadle ma heenseeye, ma haasawshe.
17. Rag wuxuu kugu bartuu kugu dilaa.
18. Ragi sadex bay ku kala baxaan, wax tegay ka hadhidii, wax jooga ka hadalkii, wax soo socda ka haloosigii.
19. Ragu sadex waa iskaga mid. Magaca, magta iyo maganta.
20. Ragu waxa uu ka sheekeeyaa biiisa dumarkuna badhaadha hooda.
21. Reer ba'ow yaa ku leh!
22. Reer guura raac iyo carruurba loo kala sheekeeyaa, is mase arkaan.
23. Reer, naagbaa kaa raacda.
24. Reerka meelan loo husan looma haatiyo.
25. Ri waalan ridaada laguma xidhto.
26. Riyuhu lugtooday shalan ku doontaan.
27. Roob magaalo ku hooray ramaas soo bixin maayee laamiguu ku raftaan.
28. Run iyo ilkaba waa la cadeeyaa.
29. Runi rag kama nixiso.
30. Ruux aan geeri iyo nolol midna ahayni/ ma dhiman mana noola.
31. Ruuxba dhiishuu ruxduu caanaheeda dhamaa.

#### Maahmaahda Qaybta "S" ka Kacda

1. Saddex baa la yidhi: Lixdan jir lexojeclo ha la wadaagin; afartan jir ha la garramin; labataan jirna ha la legdemin.
2. Saddex baa rag u liita; Ma toshe, ma tashade iyo ma tashiishe.
3. Saddex Ilaah waa karaa, mase suurowdo: Ilaahow guursan maayee wiil i sii; Ilaahow shaqaysan maayee xoolo i sii; iyo Ilaahow ku caabudi maayee jannada i gee.
4. Saddex lama arag: Marti nin ka yar, muddo maalin ka yar, salaad ragcad ka yar.
5. Saddex lama raaco: Ma horreeye, ma hambeeye, iyo ma haasawshe.

6. Saddex looma adkeysto: Gaajo guri og, gardarro garab og.
7. Saddex markaan bartaan ka gaboobay: Dab ollolintiis, carruur aamusinteed, iyo awr carraabintiis.
8. Saddex wer-werkay kugu kordhiyaan: Faraska xun, naagta xun, iyo hoyga xun; haddana saddexdaas baa kaa bi'iye.
9. Sadex col baa jira, col cad , col cas, col madaw, colka cad waa biyaha,colka casna waa dabka ,colka madawna waa dadka.
10. Sadex la lama dego, doqon fiiro taqaan,fulay daandaansi yaqaan iyo geesi damac yaqaan.
11. Sadexna la lama saaxiibo, nin aan rabi aqoon, nin aan rag aqoon iyo nin aan run aqoon.
12. Safar waa si wada yeel.
13. Sagaaro intay tub joogto bay tub kale dayataa.
14. Sagaaro inteeda waa ku duq.
15. Sagaaro laba cad oo la kal qaado ma leh.
16. Sagaaro, mindhaa ima barato.
17. Sahaydaa waa hor, socodkaana waa dib.
18. Sakaaro laba tun oo laka qalo ma leh.
19. Salaadba waqtigeedaa la tukadaa.
20. Samraa, sammoo hela.
21. Sankaagoo qudhma lama gooyo.
22. Seedi waa beer.
23. Shan nin oo shidho qayb leh, hal shanshaa ka baxda, shan ninnaan shidho qayb lahayna, shan shanshaa ka baxda.
24. Shan shidda ma macaysaa.
25. Shibiri maalibay dab qaaday buulkeedii baanay ku gubtay.
26. Shiikh markiis yimaado, shariifku, shubaakaduu ka baxaa.
27. Shinbir duul duul badani af libaax bay gashaa.
28. Shinbirba shinbirkiisuu la duulaa.
29. Shinbiri laba geed ma wada gurato.
30. Shir looma wada uunsiyo.
31. Shir naagood oo shan dhaafay waa shar.
32. Shisheeye sheela duxa ma leh.
33. Shubaali waa biyo la bax.
34. Sidaan kuugu lisay iigumaad hanbayn.
35. Sidee xeego lagu xagtaa ilkana u nabad galaan.
36. Sir ma qabe allaw sahana.
37. Sir naageed lama sal gaadho.
38. Sixun wax u sheege saaxir ka daran.
39. Sodcaal maa moodhar, sahayna waa lacag, saaxiibna waa kaba cad.
40. Soo bax baa la leeyahay sacabka leefaysaa.
41. Soo joogso laga waayaa, soo jiiifso laga helaa.
42. Soomaalidu been way sheegtaa beense ma maahmaahdo.
43. Soomaalidu waxay casarkii kugu aragtay cishihii kugu caydaa.
44. Soomalidu waa indho ku garaadle.
46. Soor quudheed lama cuno xoolo quudheedse waa la qaataa.
47. Soori waa in xil lagaga tago iyo in xarrago lagaga tago.

#### Maahmaahda Qaybta "T" ka Kacda

1. Tabcadaa ma tuugoobo.
2. Talo adigaa ku nool ee iyadu kuguma noola.
3. Talo laba adin dhexdood bay ka dhalataa.
4. Tol la'aani waa tows.
5. Tol yarraaday, tafo naagood baa laga dayaa.
6. Toladu waa mar aad gaadhi waydo iyo mar aad garan waydo.
7. Tolkaa maw talisay, mase tuugtay.
8. Tolkaaga iyo xaaskaaga midna looma xoog weynaado.
9. Tuhun waa sed.
10. Tuug la qabtay talo ma laha.
11. Tuug tuug ma xado.

#### Maahmaahda Qaybta "U" ka Kacda

1. Ul jiiifaa ma jabto.
2. Umili ilawshiinyo dhaw.
3. Usha intay qoyan tahay ayaa la toosiyaa.
4. Ushaada nin aad ka qaadi kartaa loo dhiibtaa.
5. Uur mudane iyo uur Berde, midna lama baadho.

#### Maahmaahda Qaybta "W" ka Kacda

1. Waa baahan tahay bakhtiga looma cuno.
2. Waa lagu shareeraa waxay sheegtaba ha waydee.
3. Waalida ninkii soo baraa laga waraystaa.
4. Waan xoolo yarahayna deeq lagagama hadho waan dad yarahayna dagaal lagagama hadho.
5. Waano dhalan baa ka adag.
6. Waari mayside war hakaa hadho.
7. Waayeel ha soocine, wax aqoonta sooca.
8. Waayeel hadalkiisa kaftan buu ku dhamaystaa.
9. Waayeel hortisaa caano loogu badhxaa.
10. Wadaad waa nin.
11. Wadaanta isha ka xumaataa, faylkay la tagtaa.
12. Wadaantii geeleeda kaafida, baa mid kalena kaalmeysa.
13. Wadar iyo waaxid yaa waalan.
14. Wadiiqada yari wadada wayn bay kugu ridaa.
15. Wadiiqada yari waddiqada weyn bay kugu riddaa.
16. Wakhti kaa lumay muruguu reebaa.
17. Wakhti kaa tegay tiigsimaad maleh.
18. Walaalkaa dhuux tagoogaa loogu soo subkadaa (dhaashadaa).
19. Walaalkaa markhaatiga ku fur magtana la bixi.
20. Walaalo is necebi way xoola yareeyaan wayna xabaalo badiyaan.
21. Walaashaa iskuma hubtida seedigaa haysi seegina.
22. Wan wayn jeeroo la gawraco indhihiisu cirka ma arkaan.
23. War jiraaba cakaaruu iman.
24. War la'aani waa dhego laaan.
25. War xumi dugsi ma fadhiisto.
26. Waraabaa yidhi ulna layla gaadhi waa cayna wax igama tarto.
27. Waraabe daalay, dirirtiisaa loo tagaa.
28. Waraabe dhankii loo eryaaba waw toos.
29. Waraabe ulla lala gaadhi waa, orodna wax lagaga dhibi waa.
30. Waranka ninka kugu dhufaa iyo ninka kugu dhaqdhaqaaqia ninka kugu dhaqdhaqaaqiya ayaa xun.
31. Wax aad baratay waa baaska.
32. Wax aqoon wax looma sheego.
33. Wax is waydiintu ma xumee wax is waydaarsigaa xun.
34. Wax la dhalay iyo dhul baa loo marti yahay.
35. Wax la qarashaa ama qudhme ama qubte.
36. Wax raagaa rag kuma sama.
37. Wax rag kaa galay rako kaa gale.
38. Wixii ay idho arkaan ayey ilko gooyaan.
39. Wax walba run moodaa rag ugu liita.
40. Waxa jira sadex abaar, abaar geel, abaar dumar iyo abaar rag. Abaar geel waa ilko laaan, abaar dumar waa ubad laaan, abaar ragna waa arin laaan.
41. Waxaan calaf ahayna lama cuno, waxaan hed ahayna looma dhinto.
42. Waxaan kashaada gelin, korkaaga yay dhaamin.
43. Waxaanad filanany iyo fallaari waa kaa fajiciyaan.
44. Waxaanad heli karayn waxaanad u baahnayn baa laga dhigaa.
45. Waxay ili aragto ayaa ilko gooyaan.
46. Weel waliba wixii ku jiruu dhididaa.
47. Weylasha biree dibigu ha ku quustee.
48. Wiil intuu ood ka booduu talo ka boodaa.
49. Wiilkii is waalaba wiil waabiyaa hela.
50. Wixii faq lagu sheego fagaaray tagaan.

#### Maahmaahda Qaybta "X" ka Kacda

1. Xaabo waxa la doontaa qoraxdoo soo jeeda.
2. Xaajo nimaan ogayni indhuhuu ka tuuraa.
3. Xaasidaw xoogga beel.
4. Xabaal nin leh bay qardhaba.
5. Xabaallo waalid baa xoolo lagala baxaa.
6. Xadhko geel ma wada xidhaan.
7. Xaglo geel wax guntiga la gesho ka wayn.
8. Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan.
9. Xalaafo waa Xoogii Xirsi Muude.
10. Xalaal iftin baa la cunaa.
11. Xarrago dumar xanuun ma leh.
12. Xiiso iyo xoorba way gudhaan.
13. Xog mooge xaajo waa dilaa.
14. Xoolo lama cunee dadkoodaa la cunaa.
15. Xoolo quudheed waa la qaataa, soor quudheedse lama qaato.
16. Xoorkii laga dhamay xagaagii iyo xusuus baa geel lagu xer geeyaa.
17. Xornimo adaa ku noole, iyadu kuguma noola.

